Golaha Wakiilada JSL

Waaxda Shuruucda, Hadal-qoraalka iyo Fadhiyada

Golihii 5aad, Kal-fadhigii 11aad, Fadhigii 12aad

12 May 2025

Quraanka: - Md. Sh. Axmed Dayib.

Gudoonka: - Gudoomiye Yaasiin X. Maxamuud Xiir (Faratoon)

Ajandaha Fadhiga:- *Doodda Xeerka Rahanka Hantida Ma-guurtada ah.*

Md. Siciid Jaamac Cade *(13min, 23 sec):-* Bismilaah, Mudane Guddoomiye, Mudanayaal, Saxaafada iyo Shaqaalaha ASC. Ugu horayn waa u mahadcelinayasa, Garyaqaanka guud ee Dawlada, Guddida Dhaqaaalaha iyo Maaliyadas iyo Cidkasta oo Xeerkan wax ka soo qabatay Xeerkan waan u mahad celinayaa, Runtii waan codsan lahaa guddiyada Xeeraka soo gudbinaya inay Qaybyo Qoraalka iyo Lifaaqa isku soo gurto si ay u fududaato isla akhrintu.

Runtii waa Xeer muhiim ah xaasaasiyadiisana leh, waa Xeer u baahan in cidkasta oo uu khuseeyo xaqiisa la siiyo, haddii ay tahay muwaadiniinta qaadaynta dadynta ama Maalgalinta iyo hay'adda maaliyadeed ee bixinaysa kharashkka labada in xaqooda la siiyo oo si fiican looga baaraan dego ayuu u baahan yahay.

Qodobka 1aad Magaca Xeerka oo ahaa Xeerka Rahanka Hantida Maguurtada ah ee Guddidu u bedeshay Xeerka Rahanka Hantida Maguurtada ah ee Bangiyada, Waxan soo jeedinayaan in loo daayo sidiisii hor ee ahayd **"Xeerka Rahanka Hantida Maguurtada ah",** Sababta oo ah waxa jira Hay'addo kale oo bixiya dayn ama maalgalin bixiya, sida xawaaladaha iyo sariflayaasha, dee iminka sariflayaasha shirkadaha Dahabshii iyo Oomaar hadii ay dayn bixiyaan waa laga qaadan karaa oo hay'addo maaliyadeed oo ruqsadna ka haysta Bangiga dhexe oo dawlada u diinwaagashan, markaa waa inana bangiyada kaliya aan lagu soo koobin ee xeerku uu noqdo xeer guud oo cid kasta oo bixiysa dayn

Qodoba 2aad ee Eray bixinta waxan ku daray – Hay'adaha Maaliyadeed**, "Hay'daha Maaliyadeed** waxa loola jeedaa Bangiyada iyo Hay'adaha kale ee ka diiwaangashan JSL, ruqsadna ka haysta Baanka Dhexe".

Qodobka 4aad ee Xadka Dabaqida Xeerka oo u dhignaa Sidan "Xeerkan waxa lagu dabaqayaa nidaamka Rahanka Hantida Maguurtada ah iyo Guurtada iyo hanaanka loo Xaraashayo Hantida Rahman ee loo rahmay **Bangiyada** ee ruqsada ka haysta Baanka Dhexe ee JSL. Marka anigu halka bangiyada ayaan soo jeedinayaa in laga dhigo **"Haya'daha Maaliyadeed**"

Qodonka 5aad Dhismaha Rahanka, Faqada 1aad oo odhanaysa "Qofkasta oo leh hanti ma guurto ama guurto waxa uu hantidiisa kaga Daynsan karaa Baananka dalka" sidoo kale waxaan farqadaas ku sii daray **"Dalka iyo Hay'adaha Maaliyadeed" Isla Qodobka 5aad, Farqadiisa 2aad** Iyana waxaan soo jeedinayaa in lagu daro **"iyo Haya'daha Maaliyadeed"** waxayna noqonaysaa **"Baananka iyo Haya'daha Maaliyadeed ee ka diiwaangashan JSL waxay bixin karaan Dayn hab lacageed ama hab maalgelineed"**

Qodobka 6aad Tiirarka Dhismaha Rahanka Farqada 4aad, waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo sidan **"Waa in Dayn bixiyuhu ahaado Baan (ama Hayad Maliyadeeda) oo ka diiwaangashan Dalka, ruqsadna ka haysta Baanka dhexe"**

Marka anigu meel kasta oo ahayd bangi waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo ama lagu daro **"Hay'ad Maaliyadeed"**

Qodobka 7aad ee Shuruudaha Heshiiska Rahanka Farqada 6aad oo u dhignayd *"Heshiiska Rahanka waxa waajib ah in laga diiwaangeliyo Maxkamada Rafacaanka ee gobolka heshiisku ka dhacay ku taal"* waxaan soo jeedinayaa in **Maxkamada rafcaanka** lagu badelo "**xeer-ilaalinta"** waxayna noqonaysaa sidan **"Heshiiska Rahan waa in laga diiwaangeliyo Xeer-ilaalinta Gobolka heshiisku ka dhacay ku taal".**

Qodobka 8aad ee Tilmaamaha Dayn-bixiyaha iyo Dansanaha Farqada 1aad iyadana waxaan ku daray **"ama hay'addo maaliyadeed"** waxayna noqonaysaa **"Deyn-biyuhu waa in uu ahaadaa Baan (ama Hay'ad Maliyadeed) oo ka diiwaangashan JSL, ruqsadna ka haysta Baanka dhexe".**

Qodobka 9aad Xuquuqaha iyo Waajibaadka Daynsanaha, Qodobkaas oo ka koobnaa 8 farqadood waxaan soo jeedinayaa in lagu daro **farqad 9aad** oo u dhigan sidan **"Daynsanahu haddii uu u baahdo Hantida ka Rahman ama rabo inuu Dayn kale ku qaato, mudaddii heshiiska oo aan ka dhammaan, wuu ka codsan karaa Dayn-bixiyaha inuu dayntii hore hal mar wada bixiyo"**

Qodobka 11aad Waajibka Diiwaangelinta Heshiiska Rahanka, meel kasta oo ay Meel kasta oo **Maxkamada rafcaanku** ku taalo waxaan soo jeedinayaa in loo badelo **"Xeer-ilaalinta".**

Waxan soo jeedinayaa in xeerkan lagu daro Qodob cusub oo ah **Qiimaynta Hantida La Rahmayo.**

1. Hantida Maguurtada ama guurtada ah ee laga Rahmayo Dayn-bixiyah (Baan ama Hay'ad Maaliyadeed) waxa soo qiimaynaya Khubaro /Engineero ka kala socda Dayn-bixiyaha iyo Dayn-qaataha, Ajuurada Kharshka Qiimaynta waxa bixinaya Dayn-qaataha labada dhinacba.
2. Haddii labada Khubaro/Engineero ku heshiin waayaan Qiimaynta Hantida la Rahmay, waxa diranayaan Khubarao/engineero kale oo ka madax-banaan labada dhinac ee Dayn-bixiyaha iyo Dayn-qaataha oo ay isla oggol yihiin, Kharashka Ajuuradana waxa bixinaya dayn qaataha.

Qodobka 13aad ee Dacwadaha Fulinta ah oo Gudiddu soo kordhisay Farqada 1aad halka **Maxkamada Rafcaanka** ayaan sidoo kale ku badelay **"Xeer-ilaalinta".** Sidoo kale **Farqada 2aad** halka digniinta **10 cisho** waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo **"30 cisho"**

Qodobka 16aad ee Ogaysiiska Bixin La'aanta Daynta iyo Xuquuqda Magdhowga, farqada 3aad ee ah **"Haddii Daynsanuhu muddada ku xusan farqada 2aad ee Qodobkan ku bixin waayo, Dayn-bixiyuhu wuxu qaadi karaa talaabooyinka soo socda"** tallaabooyinka oo gudiddu ka dhigtay laba, waxaan soo jeedinayaa in lagu daro mid saddexaad oo ah oo ka soo horaynaysa noqonaysa **(B)** una dhigan: -

B) Wuxu siin karaa jaanis haddii daynta ku hadhay tahay 40% ama ka yar, isaga oo u samaynaya heshiis cusub oo ku shaxaysan baaqiga daynta ku hadhsan, si ay ugu fududaato Dayn-bixinta mudada dambe ee la siiyay.

Halka hadii sharaxaad ayr ka bixiyo, hadii qofku 100 kun amaahday amaahday oo uu 60 kun celiyay, kuna hadhsan tahay 40 kun, in jaanis la siiyo oo dib loogu shaxeeyo, way dhacday iminkaba nin la damiintay oo lacagtii badh bixin waayay, markii loo geeyay bangigii siiyay oo la yidhi dib ugu shaxey, marku dib ugu shaxeeyay uu dayntii iska bixiyay.

Waxa kale oo xeerkan ka maqan oo aan soo jeedinayaa qodob aan u arko inuu yahay kan ugu muhiimsan ee inta badan abuura dayn bixin la'aanta, is-qabsiga iyo dacwadaha Maxkamadaha ee dayn-bixiyaha iyo damiinka dayn-qaataha, Xeerkan ka hor waxa jiray nin hanti malaayiin ah leh oo nin dayn qaadanaya la yidhi damiin ka noqo, hadhaw ninkii daynta qaatay la dacwayn maaye waxa la dacwaynayaa damiinkii, taas xeerkan markad dhinac ka eegto wuxuu Meesha ka saarayaa dadkii hantida lahaa hantidooda isku damiinan karaan, laakiin waxaan halkan lagu soo darin **Rate-ka Faa'iidada** daynta ama maalgelinta bangiyada oo aan xadaysnayn qaalina ah, Tusaale,

Muxuu noqon karaa Maalgelinta ama daynta hal sanno ka yar (in loo sameeyo rate flat ah oo ay ka siman yihiin) laakiin labada sannadood wuxuu bangigii qaadaa 16% oo ah lacag aad u badan, hadii uu 100 kun qaatay oo 16% waa 16 kun, 3 kun oo kaga baxday maxkamadihii iyo meelihii kale waxay noqonaysaa 20 kun, marka muxuu ka faa'idayaa markuu 120 kun celiyo, marka qofkii waa khasaare, marka waxaan soo jeedinaya in lagu daro Xeerka oo loo sameeyo flat rate hay'addaha maaliyadeed ee daynta bixiya sida baananka.

Sidaas awgeed, waxan soo jeedinayaa si loo helo Flat Rate ay ka siman yihiin Baananka iyo Haya'daha Maaliyadeed ee Maalgelinta ama Daynta bixiya, in loo yeedho Masuuliyiinta baanka dhexe, Wasaaradda H. Maaliyada iyo cidkasta oo ay khusayso ama aqoonteeda, si loo helo flat rate laga siman yahay oo lagu daro xeerkan oo aan la'aantii soconayan. Waad mahadsan tihiin.

Md. Maxamed Jaamac (Raamo) *(7min, 23 sec):* - Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal waad mahadsan tihiin, marka hore dooddaas Xildhibaan Siciid soo jeediyay aad baan u taageerayaa.

Mudane Gudoomiye iyo Mudanayaal, xeerkan rahanka hantida ma-guurtada ah oo uu diyaariyey Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Qaranka, waa mid aad muhiim ah si loo sugo nidaamka sharci ee bangiyada iyo deynta, laakiin su'aasha ugu weyn waxa weeye ma yahay xeer u adeega dhammaan dadka, mise waa mid u xidhan cid wax haysata oo kaliyaata iyo Bangiyada?

Waxaan jeclahay Mudanayaal inaynu doodda xeerkan ku metelno dhalinyardada reer Somaliland, ee waxbarashada dhameeyay ee camal la'aanta ah ee kartida leh, maskax leh, balse aan haysan meel ay ka bilaabaan nolosha bilawgeeda iyo dadka danyarta ah.

Mudane Gudoomiye, Mudanayaal, Xaaladda Dhallinyarada Somaliland waxay ka yihiin 70% bulshada, Intooda badani jaamacado ayay ka baxeenb, laakiin camal la'aan joogto ah ayey ku sugan yihiin. Waxa loo diidayaa oo xeerkani u diidayaa inay helaan fursad, sababtuna waa in aanay hanti lahayn, caqabaddu maaha karti la'aan ee waa nidaam u xidhan dadka wax haysta.

Qodobbada Xeerka ee u baahan dib-u-eegis iyo talooyin sharciyeed waxa ka mid ah **Qodobka 5aad iyo 6aad** ee xeerkan rahanka oo lagu xidhay hanti maguurto ah, Xeerku wuxuu shardi ka dhigaya in rahanku ku salaysnaado hanti ma-guurto ah. arrintaasi waxay meesha ka saaraysaa inta badan dhalinyarada iyo bulshada kale ee aan wali hanti yeelan.

Mudane Gudoomiye waxaan soo jeedinayaa in xeerku u oggolaado rahanka hanti kale oo qiimo leh sida Mushahar la xaqiijiyey, Hanti guurto la qiimeeyay iyo qorshe ganacsi oo lagu dammaanad qaado sanduuq dowladeed.

Qodobka 24aad wuxuu odhanayaa Bangigu wuu iibsan karaa hantida uu xaraashay, taasina waxay ka dhigan tahay bangii ayaa noqonaya xaakin xaraashay oo iibsaday hal mar, taas oo ah dano is-dul-saaran oo is-khilaafsan oo dhaawacaya nidaamka caddaaladda. **Sidaa darteed, waxaan soo jeedinayaa** in hantida marka hore lagu xaraasho suuq furan, oo bangigu uusan iibsan karin ilaa cid kale oo tartanta la waayo iyo hay'ad madax bannaan la socoto habka xaraashkaas la xaraashayo.

Qodobka 26aad farqadiisa 5aad, wuxuu odhanayaa **"Khasaaruhu bangiga ayuu ku dhacayaa haddii qiimaha xaraashka yaraado**, qodobkaasina wuxuu sababayaa in bangiyadu ka cabsadaan ama ka baqdaan inay dayn siiyaan da'yarta ama dadka hantida yar taas oo hoos u dhigaysa helitaanka fursad ganacsi, sidaa darteed waxaan soo jeedinayaa In khasaaraha la wadaago si aanu culaysku bangiga u dhicin, tusaale ahaan 70% bangigu qaato, 30% deyn-qaataha ama in la dhiso sanduuq caymis oo taageera khasaaraha noocaas ah.

Mudanayaal xeerkani wuxuu u muuqda in si gooni ah loola tashaday bangiyada iyo khubaro maaliyadeed, laakiin yaa matalayay dadka aan hanti lahayn? Yaa metalayay dhalinyada oo aan xeeran lagala Tashan.

Mudane Gudoomiye, Mudanayaal, Ma jiro urur si toos ah ugu dooddaya xuquuqda dhaqaale ee dhalinyarada, Ma jiraan xarumo sharci oo matasha ganacsatada yaryar ama

hal-abuurka bilowga ah. Sidaas darteed, waxaan soo jeedinayaa inaynu inagu dadkaas u hadalno. codka xildhibaankuna uu noqo codka dadka maqan.

Mudane Gudoomiye, Mudanayaal, maanta, albaabada bangiyada daymaha bixiya waxa lala taagan yahay su'aal qofka doonaya inuu dayn ka qaato la waydiinayo guri ma leedahay ama hanti kale oo aad ku rahanto, ma leedahay, ganacsade dammiin kuu noqda oo kula socda ama caaqil ku garab gala ma haysataa.

Mudane Gudoomiye, Mudanayaal, haddii qof dhalinyaro ah uu la yimaado qorshe wanaagsan iyo karti la hubo, balse aanad keenin cod bangiu aqbalo cid ma dhagaysanayso, Maanta, haddii aad karti leedahay balse aanad keenin cad bangigu aqbalo — codkaagu wuu lumaayaa, riyadaaduna waxay u ekaanaysaa riyo maalmed.

Qodobka 18[aad] ee Dastuurka Somaliland wuxuu dhigaya "**Dawladda iyo bulshada Somaliland waxay waajib ku tahay inay horumariyaan dhalinyarada si ay u helaan shaqo, waxbarasho iyo nolol wanaagsan."** Laakiin xeerkani ma taageerayo dhalinyarada shaqo doonka ah, wuuba sii adkaynayaa noloshoodii iyo inay dayn ka qaataan bangiyada.

Mudane Gudoomiye, Mudanayaal, Dhallinyaradu maaha kuwo wax inaga baryaya. Maaha kuwo raba deeq. Waxay rabaan fursad ay ku muujiyaan kartidooda. Waa in la garwaaqsadaa in fursad la siiyo maaha ikhtiyaar laakiin waa waajibaad qaran iyo sharci.

Mudane Gudoomiye, Mudanayaal, waxaan Soo jeedinayaa, In xeerku u oggolaado dhammaan dadka kartida leh inay helaan deyn, xataa haddii aanay hanti maguurto ah haysan. Si loo damaanad qaadona waa In la dhiso Sanduuqa Dammaanad-Dhallinyarada oo qaranku leeyahay, sidoo kale waa In qodob gaar ah lagu daro Xeerkan si toos ah u dammaanad qaada fursadda dhalinyarada.

Ugu dambayn, waxaan si gaar ah ugu mahadnaqayaa bangiyada dalka ee daymaha bixiya, Waxaan aqoonsanahay kaalintooda dhaqaale iyo horumarka ay dalka kaga jiraan, balse waxaan sidoo kale leenahay, Bangiga dhallinyarada fursad siiya, waa bangi mustaqbal dhaliya. Bangiyadaw dhegeysta codka dhallinyarada, fududeeya shuruudaha, aamina hal-abuurka raba inuu dalkiisa dhiso, qofka hal buur la yimi ee karti iyo fikir la yimi laakiin lagu xidhay hanti ma guurto ah taasi ma soconaysa,

Mudane Gudoomiye, Mudanayal, waxaan soo jeedinayaa inay codkeena ugu hiilino xeerkana u xusno in dhalinyaradaasi ay helaan damaanad qaad iyo dadka kale ee hal-abuurka ganacsi laakiin ganacsigoodu bilawga yahay. WSC.

Md. Axmad Cabdi Ibraahim (Timo-jilic) *(8min, 09 sec):* - Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal waxaan anigu aad uga hadlayaa oo yar taabanayaa Cutubka 4aad. Xildhibaanadii iga horeeyay qodobo badan oo aan ku taageersanahay bay aad uga hadleen, laakiin Xildhibaan Siciid qodob baan kaga soo horjeedaa, arrinta Maxkamada Rafcaanka, maxkamada rafcaanku sharciyan waa maxkamada hanti kasta oo ma guurto ah

diiwaangalisa, haday gobol tahay iyo haday caasimad tahay iyo haday heer qaran tahay, xeer-ilaalinta marka laga hadlayo waxay sharciyan difaacdaa dambi kasta oo dalka iyo dadka laga galay, sidaa darteed, lawyer-kii dib uma noqon karo ma labaad diiwaanglaiye, markaa diiwaangelin kasta oo hantiyeed waxa iska leh maxkamada racfaanka.

Bangiga dhexe wuxu masuul ka yahay dhammaan qiimaynta lacagaha qalaad gabiahaanba isaga uunbaa jari kara qiimaha Sayladeed ee sarifyada lacagaha qalaad una gudbaya dalku isticmaalka gudHa DALKA isagoo Somaliland shilling ah iyo sidoo kale shillinka Somaliland ee isubadalaya lacag qalaad. banku masaarikaro qiime kabadan 2%100. Every round trip transaction.

Qodobka 35aad Waajibaadka Baanka dhexe ee JSL sida ku cad waajibaadada Banka dhexe waxan ku darayaa:-

- Daynkastaa intay dhamaanayso inuu banku gacanta ku hayo hantiyaha labada dhinac kirro kastana qabto isagu account-na u sameeyo si loo badbaadiyo dhib dabiicya oo dhacdey inay lumiso xaq mid kamid ah dhinacyadu leeyahey,
- Bangiga dhexe ayaa haynaya qabanayaa kirada kasoo hoyata daynsanaha hantidiisa laba gooraba waxa xafidaya bangiga dhexe waaxana lagu xafidayaa nooca hantida soo hoyataa tahay taasoo loo eegayo exactly lacagta heshiiska deyntu ku qorantahay.
- Bangiga dhexe wuxuu damiinanayaa kaliya waxa uu awood ahaan u leeyahay innuu damiinan karo si buuxda oo khasaare kasta oo dhaxa xalililkaro, isagu xataa haddii dadka shirkadaha uu damiintay xalilkariwaayaan.
- Bangiga dhexe wuxu toos masuul uga yahay in damiin kasta oo rahan isugayn ahaan uu meel dhigo 20% kasareeya marka laysu geeyo dhammaan maaliayadaha rahan ee dhacaya oo dhan.
- Bangiga dhexe waa inuu ka helaa dawlad damiinka uu qarran ahaan sameeynayo sii xaqiijisa waana in dawlada dhexe heshaa awoodaha lagu xalilayo dhibaato dabiici ah iyo khasaaraha ay keento. Dhalinyarada laga hadlayo ama ciddii muwaadiniin ah ee aynu doonayno noloshooda inaynu kor u qaadnaa damaanada ku jirta waa in la helaa oo Golaha sameeyayaa dhul ugu yaraan uu bangiga dhexe leeyahay oo uu ku badbaadin karo khasaarayaasha.
- Shirkad kastaa waxa uu banka dhexe damiinan karaa awoodeeda dhaqaalle aamin iyo maaliyadeedba oo la badbaadiyay 20% bangiga iyo institution-ku isla gartaan oo isla meel dhigaan, halka waxa ka dhalanaya qodob Insurance ah, qofka daynta qaadanaya maaliyadan uu rahmayaa waa inay insurance leedahay, isla xeerkani waa inuu waajibiyaa in xeerkii caymisku uu dhaqangalo, waayo waxyaabahan la rahmayo qaar baa gudan kara, xeerkuna wuxuu qeexay in institution-ka daynta bixiyay ayuu raacayaa kharashka dhibta ahi, waana arrin aan anigu taageersanahay.

- **Magaca xeerka** waxaan ku raacsanahay Xildhibaan Siciid **Mudane Siciid Jaamac.**

Md. Maxamuud xayir Ducaale *(2min 12sec):-* Bismilaahi, Mudane Gudoomiye waad mahadsan taha. Anigu waxaan ka hadlayaa xeerkan, dood wayna ka gali mayo xeerkan, waxaynu nahay dadkeena iyo Goleheenuba dad islaam ah ayaynu marka hore nahay.

Xeerarka aynu ku dhaqmaynu illaahay baa inoo dajiyay 1,400 oo sanno ka hor, markaa xeerarka aynu samaynayno marka hore waa in aynu u eegnaa shareecadeena islaamka ee illaahay inoo dajiyay, maku salaysan yihiin oo mawaafaqsan yihiin mise ma waafaqsana.

Xeerkani waa xeer maaliyadeed, waa xeer dayn la kala qaadanayo waa xeer damaanad iyo xisaaabo galaya, xeerkan waxaan qabaa in aanu waafaqsanayn sida aynu u wadno.

Waxaan soo jeedinayaa, in marka ugu horaysa lagu celiyo Guddida shareecada islaamka si ay ugala tashato, culimada islaamka, culimada dalkeena si ay ugala tashato oo loogu saleeyo shareecadeena fiqiqa iyo Axkaamta shareecada islaamka.

Waxaan leeyahay oo aan soo jeedinayaa halkaa uu taagan yahay in lagu joojiyo Gudida shareecada iyo shuruucda wacdiga ah in lagu celiyo loo dhiibo si ay ugala tashadaan oo lagu saleeyo shareecadeena ayaan anigu soo jeedin lahaa.

Golihii 5aad Kal-fadhigii 11aad, Fadhigii 13aad

24 May 2025

Quraanka: - Md. Shiikh Siciid Sokeeye

Gudoonka: - Md. Siciid Mire Faarax (Giire)

Ajandaha Fadhiga:-

- *Doodda Xeerka Rahanka Hantida Ma-guurtada ah ee maalinta labaad*

Md. C/rashiid C/laahi Muuse (Cagaweyne) *(05min 20sec):-***:-** ugu horayn waxaan salaamayaa Shir-gudoonka, Mudanayaasha, Garyaqaanada iyo Shaqaale waynaha Golaha, waxaan si gaar ah u salaamayaa Gudoomiye ku-xigeenka 2aad Cali Xaamud Jibriil Faarax.

Waxaan u mahadnayqaa Guddidda Dhaqaalaha oo runtii xeerka shaqo wayn ka soo qabatay.

Mudane Gudoomiye, Xeerka rahanku waa xeer aad muhiim ugu ah qaranka, waana xeer ay u xanibanyihiin baananka Somaliland, rahankii ay rahmayeen ma jiro xeer u ogolaanaya inay xaraashaan rahanka ay rahmaan.

Ugu horayn waxaan soo jeedinayaa in Xeerkan Rahanka loo gudbiyo oo la soo mariyo Gudidda Shareecada si aynaan Illaahay ugu kala fogaanin oo aan dambi inooga raacin waxaynu gacanta u taagnay in barrito la inagula xisaabtamo, waayo waxa soo galaya macaamalaad u baahan in shareecada islaamka la waafajiyo oo culimada loo bandhigo, guddida dhaqaaluhu qodobaday ku soo dareen Iyana inay shareecada waafaqsan yihiin, mar hadii xeerka la qoro oo aynu ansixino qodobadiisu barito waxay noqonayaan sharci la isticmaalo oo lagu fuliyo muwaadiniinta iyo dayn-bixiyaha.

cid kasta oo xeerkaas lagu xukumo oo lagu dhaqo masuuliyadiisa Golaha Wakiillada ayaa qaadi doona Ilaahay hortiisa, marka yaynaan ku deg degin oo aynaan odhan xeer aynu ansixino. Laakiin masuuliyada ina saaran ee ah in la inagala xisaabtamidoono Illaahay SWT barrito ina waydiin doono masuuliyadaas uu ina saaray.

Marka waxaan aad ugu adkaynayaa oo ugu celcelinayaa in Guddida Shareecada la mariyo oo aan la ansixin ilaa guddidaasi soo eegto.

Qodobada Xeerka laba qodob baan anigu taabanayaa oo ka hadlayaa.

Qodobada 12aad, 13aad, 14aad iyo 15aad waxay guddidu tilmaameen inay ka saareen Xeerkii, waxay sheegeen in qodobadaas qaar laga saaray, qaarna qodobo kale loo wareejiyay, marka may tilmaamin qodobada ay ku dareen ee u wareejiyeen kuwa ay yihiin kumana arag qodobada kale ee xeerka.

Qodobka 6aad ee shuruudaha abuurida rahanka waxaan soo jeedinayaa in lagu daro farqad cusub oo ah **"qofka rahmaha waa in aan cashuur lagu lahayn"**

Qodobka 14aad farqadiisa 4aad ee odhanaysa **"Dhinaca Deyn-qaataha ayaa bixinaya lacagta diiwaangelinta haddii aanu heshiis kale oo dhinacyada u dhaxeeyaa jirin"**

waxaan soo jeedinayaa in laga saaro, waayo wuxuu waajibnayaa fee diiwaangalin ah.

Qodobka 15aad Farqada 2aad waan ku raacsanahay guddida in laga saaro

Md, Maxamuud Saalax Cabdi *(02min 27sec)*:- Marka hore waxaan salaamayaa Shir-gudoonka iyo Xildhibaanada Sharafta leh, Garyaqaanada iyo Shaqaalaha.

Intaas ka dib, waxaan taageerayaa (secondment) soo jeedinta Xildhibaan C/rashiid C/laahi Muuse ee ku saabsan in Guddida shareecada la mariyo xeerkan iyadoon waxba u dhimayn shaqadii iyo dedaalkii Guddida Dhaqaaluhu soo galisay, ayna ku mahadsan yihiin, hadana, madaama dastuurka qodobada aassaaska u ah ay ka mid tahay in shareecada Islaamka wixii ka soo horjeeda waxba kama jiraan yihiin oo ay is waafaqaan shareecada iyo xeerarka la samaynayaa.

Marka ana waxaan soo jeedinayaa in guddida shareecada lagu celiyo si ay uga soo baaraan degaan maadaama xeerku yaha mid dhaqaale ku saabsan, dhaqaaluhuna saamayntiisa uu leeyahay.

Md. C/kariim Meecaad Isaaq *(01min 08sec)*:- Marka hore waan salaamayaa Shir-gudoonka, Gudoomiyaha, Xildhibaanada iyo Shaqaalewaynahaba.

Hadaan eego Xeerka, Xeerkani waa xeer aad u sal-balaadhan, waxaan la qabaa Xildhibaanadii iga horeeyay ee soo jeediyay in loo baahan yahay in laga baaraan dego xeerkan madaama uu waxyaabo badan waafajinayo.

Waxaynu u baanahay in gudi gaar ah oo Guddida Shareecada iyo Guddidii Dhaqaalaha labadaba loo saaro oo Xeerkaas wixii shareecadu ay ka qabto, si aynaan ugu xadgudbin oo galin gef diimeed oo ina daba socda ilaa waligeen, waana in laga fikiro waayo xeerkan waxa lagu dhiqi doona dad badan iyo jiilasha dambe, wuxuuna noqonayaa xeer muddo badan sii shaqeeya, marka waxa loo baahan yahay in wax la hubo aynu umada u gudbino oo aan hadhaw la inagu caayin la inaguna dhaleecayn.

Madaama dastuurka wadanku uu dhigayo wixii shareecada ka soo horjeeda inay waxba kama jiraan tahay. Sidaa darteed, anigu waxaan taageerayaa (secondment) in xeerkaas loo eego shareecadu waxay ka qabto, dabadeedna ansixino inagoo lafagurnay oo aan wax shaki ah ku jirin hadii Illaahay SWT yidhaahdo. WSC.

Md. Xasan Cumar Xasan (Xasan-ogaa) *(02min 02sec):-* Marka hore Illaahay SWT baa mahad leh, Mudane Gudoomiye, Xildhibaanda iyo Shaqaalewaynaha waan idin salaamayaa ASC.

Runtii qabyo-qoraalka Xeerka Rahanka Hanti ma guurtada ah marka loo eego baaxada xeerku waa mid balaadhan, waa xeer dhinac badan soo galayaa, waa xeer hanti tilmaamaya, masuuliyad laba dhinac ah tilmaamaya, qofka wax qaadanaya ee wax daynsanaya iyo qofka la dayminayo. Dhinacyo badan buu soo galayaa runtii, waayo qofka wax daynsanyaa kolba lacag uu qaadanayo waxaad moodaa inay si wayn ugu fadhido oo marna ay yartahay marna ay badantahay iyadoo loo eegayo xadiga lacagta uu qaadanayo.

Marka waa xeer dhaqaale oo guddida dhaqaalaha ayaa mandate u haysta, guddida shareecadu dhinac bay ka soo galaysaa.

Sidaa darteed, Mudane Gudoomiye, waxaan soo jeedinayaa in Gudi isku dhaf ah oo gudi gaar ah (ad hoc committee) dib loogu diro, wakhti kooban la siiyo si ay dib u eegis ugu soo sameeyaan, si sida gudoomiyuhu sheegay in xeearka ajandaha inoogu jira inaga baxaan oo ah wax qaranka iyo inagoo dhanba iska sugayno, marka Gudoomiye anigu waxaan soo jeedinayaa in guddida shareecada laga daayo, laakiin gudi isku dhaf ah loo saaro muddo kooban oo aan kal-fadhigan dhaafayn la siiyo. Waad mahadsan tihiin, WSC.

Gudoonka, Md. Siciid Mire:- Mudanayaal waxa muuqata wax dood ah oo xeerkaas kaga qayb-qaadano aanay jirin, waan ixtiraamayaa Mudanayaasha soo jeedinayay in Shareecada Islaamka la waafajiyo, maadaama Dastuurkeenu sheegay in wixi shareecada ka horimanaya waxba kama jiraan yihiin.

Mudanayaal, shaqo qaran baynu haynaa, kal-fadhigeenii waa gabo-gabo, xeerar badanina way inoo yaaliin oo xeerkii dhakhliga oo xukuumada ka soo noqday, marka waxaan codsanayaa in muddaas kooban ee kal-fadhiga ka hadhay Mudanyaashu goor hore fadhiga ka soo xaadiraan si aynu waajibaadkeen qaran u gudano. Fadhiguna wuu inoo xidhan yahay. WSC.

Cawad Cali Maxamed	C/risaaq Siciid Ayaanle
Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/G/Wakiilada	Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl
--	--